




# Ciqaab


- Adelheid Marie Bwire
- Melany Pietersen
- Abdi Muse
- 2
- Soomaali SO



Maalin maalmaha ka mid ah, hooyo waxay  
heshay miro badan.



"Goormaa wax miro ah heleyntaa?" ayaan weydiinay. "Waxaan miraha cuni doonaa caawa," ayay tiri hooyo.




Walaalkay Rahim waa mid dhuuni ah. Waxa uu dhadhamiyaa midhaha oo dhan. In badan na waa uu ka cunaa.




"Bal eeg waxuu Rahim sameeyey!" Waxaa ku qayliyay walaalkayga yar. "Rahim waa akhlaaq la aan iyo bakhayl," Ayaan dhahaa.



Hooyo waxay u caraysantahy Rahim.




Waxaan sidoo kale u caraysannahay Rahim.  
Laakin Rahim kama xumo.



"Miyaadan u soconin in aad ciqaabto Rahim?"  
ayuu waydiiyay walaalkayga yar.



"Rahim, dhakhso waad kashalaayi doontaa,"  
hooyo ayaa ugu digtay.



Rahim ayaa billaabay inuu dareemo xanuun.



"Caloosha ayaa aad i xanuunayso," ayuu  
Rahim ku gunuunacay.



Hooyo ayaa garanaysay in ay taas dhacayso.  
Mirtii ayaa ciqaabeyso Rahim!



Ogu danbeytii, Rahim ayaa nagu yidhi waan ka xumahay. "Marnaba markale ma noqon doono mid saaid dhuuni u ah," ayuu balanqaaday, waana aaminnay dhammaanteen isaga.



# Global Storybooks

[globalstorybooks.net](http://globalstorybooks.net)

## Ciqaab

✎ Adelheid Marie Bwire

✒ Melany Pietersen

☞ Abdi Muse

